Fanka: Muraayad Bulshadu Iska Daawato!

Bilaal Q. Fiqi "Aar"

Hor iyo horaan, sida diiwaanka ku taal, waxa ugu mudan ee suugaanta Soomaalida lagu ammaani karo waa maansada. Ka gadaale, waa fanmasraxeedka! Fanmasraxeedka Soomaalidu waxa uu biqlay markii u horraysay rubuc horraadkii qarnigii tagay; kaas oo dheegasho, dhiraandhirin iyo halabuurba lehaa. Fanmasraxeedkaas ayaa ahaa muraayad ay bulshadu iska daawato: samaheeda iyo xumaheeda.

Waxa uu ahaa kacaan dhaqameed ka unkamay isdhexgalkii Soomaalida iyo bulshooyinkii dibedda ugaga yimid, gaar ahaan kuwii gumaystaha. Iyo, dhaqan ay Soomaalidu ka soo waaridday shisheeyaha ay dhulalkiisa tagtay, gaar ahaan Carabta.

Judhiiba, halabuurkii sebankaas, waa uu la jaan helay, fanmasraxeedka, markaas buu si walba u curiyay. Mar kaliya ayaa waxa carrabkiisa cirka la gaaray kacaan masraxeed cusub oo aanay Soomaalidu ab iyo isir toona u lehayn! Riwaayad.

Dhaqankii hadlaaga ahaa ee Soomaalida iyo fankii masxara ee doolka ahaa ayaa si toobboon isu la falgalay. Maxaayeelay, fanmasraxeedku waa sida ugur tumaal, oo waxa uu mar kaliya wada qaadi karaa dhawr jaad oo qaybaha ka la geddisan ee suugaanta ah, siiba middii ay Soomaalidu ku waalnayd ee suugaanta la mariyo: *maansada*.

Muddadii koobnayd ee fanmasraxeedka Soomaalidu jiray waxa uu dusha u ritay in uu xambaaro halgankii gobannimadoonka iyo daljirnimada, iyo mashruucii qarandhiska iyo midaynta ummadda Soomaaliyeed. Tan ugu mudan se waxa ay ahayd ka hummaagbixinta habnololeedka bulshada Soomaaliyeed iyo dhaqamada silloon ama san ee soo kordha.

Walow uu anuug ahaa, haddana, fanmasraxeedka Soomaalidu waxa uu ku koobnaa ka sheekaynta labo walxood: jacayl iyo waddaniyad. Malahaygana, waxa ay ahaayeen wixii ugu muhiinsanaa ee uu jeerkaas xirgigii halabuurluhu soo daaci karay! Ayaandarro se, Kacaankii Hantiwadaagga, iftiinkaas yar ee baxayay waa uu shiiqiyay, ka dib markii uu halabuurkii xorriyadda ka qaaday oo uu guulwadaynta xoojiyay. Waxa se ruuxtogay burburkii dalka ka dhacay ee wax walba oo kale cagta mariyay. Haatan, waxa ka sii *wis* leh waa hees leh ujeeddo aan sii ridnayn.

Fanku waa "muraayad" laga daawado sawirka bulshadaas uu ka warramayo. Waa hummaagbixiye. Haddii la doonayo "muraayad" weji qurxoon laga daawado waa in wejiga la qurxiyaa, maya in muraayadda qurxin loogu dhaqaaqo! Geddaas oo kale, haddii la doonayo fan qurxoon, waa in la helaa bulsho leh dhaqan qurxoon.

Muraayaddii (*fankii*) ay Soomaalidu iska daawan jirtay waxa ay la burburtay daarihii Xamar iyo wixii ku hoos jiray.

Awyaalow, muraayad aan mar kale iska daawanno ma heli doonnaa?